PEOPLE FOR EDUCATION
because education matters most

Talo ku socota Waalidiinta

Kaalinta waalidka ayaa waxtar leh

Bisha Agoosto ee sannadkii 2011, ururka Waxbarashada Dadwaynaha [People for Education] waxay soo saartay warbixin warbixinta waxaa loogu magac daray, Qabashada waxyaabaha ugu humiinsan: Sida waalidiinta ay gacan uga gaysan karaan si carruurtooda iskuulka ay ugu guulaystaan, warbixintaas waxay ahayd mid lagu eegay daraasad soddon sano ah oo laga sameeyay wadamada Kanada, Maraykanka iyo Ingiriiska.

Waxaa jira afar sheey oo ugu muhiimsan ee waalidiinta ay qaban karaan kaas oo ubadkooda ka caawin kara in iskuulka ay ku najaxaan waa kan halkan ayaa lagu sharraxey afarta:

1. Kor u qaad rajooyinka aad ka filanaysid carruurtaada.

Carruurtaada ku wargeli muhiimadda ay kuu leedahay in iskuulka ay ku guulaystaan. Waa waxa ugu wayn ee saamayn wanaagsan ku yeesha ardayga inuu iskuulka ku guuleysto taas waxay tahay in waalidka looga baahan yahay inuu kor u qaado rajooyinka waalidka uu ardayga ka filanayo. Goorta waalidiinta si joogto ah ay u aaminaan ixtimaalka carruurtooda oo ayna carruurtoodana u sheegaan in ay ka doonayaan in waxbarashada ay guuleystaan, ardayda waxbarashadooda way ku fiicnaadaan.

2. Kala hadal waxyaabo iskuulka ku saabsan.

Carruurtaada ka wada hadla waxyaabaha iskuulka ka dhacaya – nashaadaadka, barnaamijyada iyo waxyaabaha ay baranayaan. Waxaa la yaab leh, in tan ay tahay saamyntaa ugu wayn marka loo fiiriyo la socoshada layliska guriga, inta guriga aad sii joogto marka iskuulka laga soo laabto, ama in la xadido inta saacad ee loo ogol yahay in Tvga ay daawadaan ama inta toddobaadka lagu jiro banaanka u baxaan.

Sida carruurteena laga soo xigtay, waxaa dhici karta in annagu howl wanaagsan aanan meelahan ka qabannayn. Waxaa jirtay ra'yi-ururin ay sameeyeen Xafiiska la Xisaabtanka iyo Tayada Waxbarashada [Education Quality and Accountability Office (EQAO)], in ka yar nus ka mid ah ardayda dhigata fasalka 3 (46%) waxay sheegeen in waalidka ama mas'uulka ay "maalin kasta ama ku dhawaad maalin kasta" ay ka wada hadlaan waxyaabaha iskuulka ka dhacaya. Marka ay gaaraan fasalka 6, boqolkiiba 38% ayay hoos u soo dhacdaa.

3. Carruurtaada ka kaalmee in ay la yimaadaan aragti iijaabo leh oo ku aadan waxbarashada iyo caado waxqabad wanaagsan.

Daraasadda la sameeyay waxay muujinaysaa waxa ugu wayn ee aad raad ugu yeelan karto ubadkaaga fursadahooda ah in iskuulka ku guulaystaan waxay ka timaadaa adiga sida aad raad ugu yeelato dabcigooda, dareenkooda waxqabsiga shaqsi, iyo caadooyinkooda waxqabad shaqo, oo ay ku jirto dadaal, in kaalmo la raadsado, iyo qorshayn.

Sidaa-awgeed halkii ay ka ahaan la'hayd in si toos carruurtaada aad wax u "bari" la'hayd, waxaad ahmiyadda saartaa in aad ka kaalmayso inaad wax kala qabato waxyaabaha kalsoonidooda carqaladeeya iyo waxa ka hor istaaga, ku dhiirrigeli dadaalka iyo joogtayta dadaalka iyo inay si cad u

muujiyaan dhaqan iijaabo ah guud ahaan dhanka iskuulka. In yar - in yar, kuwan ayaa ah waxyaabaha aassaaska u ah sida looga dhisi la'haa in guushoodu ay noqoto mid joogto ah.

4. Wax wada aqriya (luqad kasta ha noqoto)

Wax aqriska ayaa ah mid ka mid ah waxyaabaha aassaasiga u ah waxbarashada oo dhan, adiguna kaalin aad u wayn ayaad ka qaadan kartaa adiga oo carruurtaada u aqriya oona kala hadla buuggaag iyo sheekooyinka. Carruurta wax la aqriya ayaa ah dariiqa ugu fiican oo iyaguna ka dhigaya in ay noqdaan kuwa wax aqriska jecel. Laakiin tan micnaheedu ma ahan in aad ku qasabto in si qaylo ah ay wax u aqriyaan. Halka ahmiyadda lagu saari la'haa in ubadkaaga aad barto nidaamyada wax aqriska, bar in wax aqriska ay ***jeclaadaan***. Wax aqriska ka dhig mid maweelo ah oo la jecleysto!

" Daliisha way iska caddahay. Waalidiinta isbaddel ayay sameeyaan. Sida kaalin ay u qaadan karaan waxbarashada ubadkooda ayaa ah waxyaabaha ay guriga dhexdooda ay ku sameeyaan. Waalidnimda wax adag ayay noqon kartaa, laakin fariinta fiican ayaa waxay si ubadkaaga aad uga caawiso inuu iskuulka ku guuleysto uma baahnid inaad noqoto 'tabarrucaha sannadka' ama aad noqoto qabiirkii dagaalkii 1812 .

Mar labaad, carruurteena waxay inoo sheegayaan inuu jiro waxyaabo la wanaajin karo marka laga hadlayo wadajir wax u aqrinta. Rayi-ururintii laga qaaday ardayda oo ay qaadeen xafiiska EQAO waxaa lagu ogaaday in boqolkiiba 21% kaliya ee carruurta dhigata fasalka 3 ay sheegeen in si wadajir ah ay waalidkooda ama qofka mas'uulka ka ah ay wax isla aqriyaan "maalin kasta ama ku dhawaad maalin kasta".

Daliisha way iska caddahay.

Waalidiinta isbaddel ayay sameeyaan. Oo sida ay uga gacan geysan karaan waxbarashada ubadkooda ayaa waxay tahay waxyaabaha ay guriga dhexdooda ku sameeyaan. Waalidnimada waa loolan, laakiin wanaagsanaanta kaliya ma ahan inaad noqoto 'tabarrucaha sannadka' ama aad noqoto qabiirkii dagaalkii 1812'

Waalidka kaalinta ay ka qaadan karaan howlaha iskuulka

Ha noqoto adiga oo taga howlaha iskuulka lagu qabto sida konsheertada, taageerida kooxda ciyaartooyda iskuulka, ama ka qaybgalka dhacdooyinka xaafadda iskuulka ku yaala ka dhaca iyo kulamadda ay qorsheeyeen guddiga iskuulka, ka qaybqaadashada waalidka oo ka qaybqaata howlaha iskuulka ka dhaca waxay u taagan tahay dareen ka mid ahaanshaha jaaliyadda. Waxay dhisi kartaa xiriir aad u waagsan ee u dhaxeeya waalidiinta iyo macalimmiinta, oo taas waxay fursad siinaysaa waalidiinta in midba midka kale xiriir isla yeeshaan.

Howlaha iskuulka dhexdiisa ka dhaca waxaa dhici karta in saamayn toos ah aysan la la'hayn guusha ardayga, laakin waa wax baashaal ah oo waa dariiq adkayn kara jaaliyadda iskuulka uu ku dhexyalo. Adiga markaad awoodo, fursaddan ka faa'idayso in aad ka qaybgasho dhacdooyinka iskuulka ka dhacaya si iskuulka carruurtaada aad taageero u muujiso.

People for Education waa codkaaga waxbarashada dadwaynaha.
Annagu waxaan nahay urur madaxbanaan oo ka shaqeeya sidii loo taageeri la'haa waxbarashada dadwaynaha ee iskuullaadka ay dowladdu gobolka Ontario maalgeliso.

People for Education
641 Bloor Street West, Toronto, ON
M6G 1L1 Telfoon. 416-534-0100
www.peopleforeducation.ca